**Daawada qaaxada laguu qoro waa;**

| | | | |
|---|---|---|---|
| Isoniazid | ________ | mg/_________ | kaniin maalin kasta |
| Rifampin | ________ | mg/_________ | kaniini maalin kasta |
| Rifamata | 150/300 | mg/_________ | kaniini maalin kasta |
| Pyrazinamide | _______ | mg/_________ | kaniini maalin kasta |
| Ethambutol | ________ | mg/_________ | kaniini maalin kasto |

*Waa muhiim inaad wada qaadato daawada qaaxada ee laguu qoray xitaa hadaadan jiraneyn*.

Sikastaba , hadii aad isku aragto waxyaabahan soo socda wac dhaqtarkaaga,nursiskaaga ama faydhoorka caafimaadka si deg deg ah.Ha sugin balantaada soo socota hadii aad qabto dhibaatooyinkaan

**Maqaarka ama indhaha oo jaalo noqda xumad**
**Matag iyo shuban**
**Daal badan ama tabar dari**
**Gudguduud ama cuncun**
**kaadida oo madoobaata**
**Saxarada oo cadaata ama garey noqota**

Weligaa ha u qaadan laba laab daawada
Ha u ogolaan qof kale inuu qaato
Ka fogee meelaha caruurtu gaari karaan

Bilowdo inaad qeybaha kala duwan eeqamrada cabto maalin walba
Yeelato uur
Wac dhaqtarkaaga ama nursiskaaga haddii aad

Bilawdo daawo cusub
Isku aaragto qufac cusub, xumad ama caatowdo


Seattle King County Dept. of Public Health
Tuberculosis Control Program
Harborview Medical Center
Box xxxxxxx
Seattle, WA 98104


EthnoMed
http://healthlinks.washington.edu/clinical/ethnomed


This publication was made possible by a contract from the Washington State Department of Health, Tuberculosis Division. The contents were translated by Harborview Medical Center Interpreter Services from an Seattle King County Dept. of Public Health pamphlet. Revised 7/99.


# Daawooyinka lagu Daaweeyo qaaxada

ISONIAZID
RIFAMPIN
RIFAMATE
PYRAZINZMIDE
ETHAMBUTOL

**Bukaanka Magaca;________________________**

**Daawada Bilow Maalinta;________________________**

## Isoniazid

Calaamadaha kale eed fiirineyso intaad qaadaneyso INH waa:

dareen la'aan ama wax ku soc socosho ood ka dareento faraha iyo suulasha

markiiba u sheeg dhaqtarkaaga ama nursiskaaga haddii aad qaadaneyso ama aad bilaabeyso daawooyinkaaaan inta aad qaadaneyso INH:

- Antabuse[joojiso qamro cabida]
- Dilantan[gariirka ama qalalka]

## Rifampin

Calaamadaha kale aad fiirineyso inta aad qaadaneyso rifampin

- dhaawacmeyso si fudud ah
- dareen la'aan ama dareento wax kaaga socsocdaan faraha iyo suulasha
- xanuunka caadada oo bata

Rifampin waxey kaadida, dhididka, candhuufta, oohinta iyo saxarada ka dhigeysaa guduud ama orange inta aad qaadaneyso daawadani. Arintan iyada ahi waa caadi wax dhibaato ah kuu geysan meyso
si kastaba, muraayada indhaha la geliyo waxa ku haraya jaalo.

markiiba u sheeg dhaqtarkaaga ama nursiskaaga haddii aad qaadaneysid ama bilaabeysid  inaad qaadato daawooyinkan inta aad rifampin qaadaneysid

Daawooyinka ilmo ka hortaga uurka sida kaniiniga, tan durida ama maqaarka la geliyo:

- Joojisa isticmaalka drugiska
- Theophillin[sambadaada loo isticmaalo]
- Daawooyinka wadnaha, dhiiga iyosonkorta, steroids, ama daawo kaa caawineyso inaad degto.

## Rifamata

Rifamata waa daawo hal kabsolo ah oo isugu jirta150m  oo INH iyo 300mg oo rifampain ah .
Calaamadaha kale aad fiirineyso intaad qaadaneyso rifamata waa

- dareen la'aan ama caaro caaro ka dareento faraha iyo suulasha
- si fudud u dhaawacmeyso
- caadada xanuunkeeda oo bata

Rifamaata waxey kaadida, dhididka, candhuufta, oohinta iyo saxarada ka dhigeysaa guduud ama orange inta aad qaadaneyso daawadani. Arintaan waa caadi wax dhibaato ahna kuu geysan  meyso. Sikastaba, muraayada indhaha waxaa ku harayo jaalo.

Markiiba usheeg dhaqtarkaaga ama nursiskaaga haddii aad qaadaneysid bilaabeysid inaad qaadato daawooyinkan intaad rifamato qaadaneysid:

- DaawooyinkaAntabuse [joojisa qamra cabida]
- Dilantan [ gaariirka ama qalalka loo qaato]
- Daawooyinka ilmaha  looga hortago sida kaniiniga,tan durida,ama maqaarka hoostiisa la geliyo.
- Joojinta daragiska xididka laga qaato.
- Theophillin(sambabada).
- wadnaha,dhiga iyo sonkorta,steroids,ama daawo kaa caawineysa inaad degto

## Pyrazinamide [PZA]

Calaamadaha kale ee aad fiirineyso inta aad qaadaneyso PZAwaa

- kala goysyo xanuun ama barar leh
- kaadidoo ku dhibto.

Wax dhibaato laguma arko marka aad PZA la qaadaneyso daawooyinka kale.

## Ethambutol

Calaamadaha kale ee aad firinayso inta aad qaadanayso Ethambutol waa;

- Aragtida oo caad kaa gala
- wax aqrinta oo kugu dhib noqota,
- colorada guduudka iyo cagaarka aragtidooda oo dhib noqota
- xanuun kala goysyada ama barar.

Ethambutol, waxaa laga yaabaaa in ay keento aragti xumo,indhaha ayaa lagaa fiirin ka hor iyo inta aad qaadaneyso Ethambutol taas oo la socota balamada caadiga ah  ee dhaqtarkaaga.

Wax dhibaato laguma arko marka aad Ethambutol la qaadaneyso daawooyinka kale.